

## **Degmaran Borlänge – Codsiga gaadiidka dugsiga ee sannad dugsiyeedka 2024/2025**

Waalidiinta ama qofka masuulka ka ahh ilamaha ardayda xaqa u leh baska dugsiga ee dugsiga hoose dhexe, marka laga reebo ardayda dugsiyada hoose ee gaarka ah, waa in ay soo codsadaan hal mar sannad dugsiyeedkiiba.

Ardayda lagu meeleyay guryaha qoysaska kale, ardayda haysata tira qofeedka ku meel gaardhka ah iyo adiga oo aan fursad u helin inaad si dhijital ah u codsataan waxa laguu tilmaamaya in codsiga kusii gudbisato isaga oo warqad ah, waxaadna ka helaysaa foomkaas degmada xafiiskeeda adeegga.

Dadka haysta aqoonsi la ilaaliyo ama codsaday aqoonsi la ilaaliyo waa in aanay isticmaalin adeegga elektrooniga ah, taas beddelkeeda codsiga waa in lagu sameeyaa foomka laga heli karo dhanka xarunta adeegga ee degmada.

## **Codsiga sannad dugsiyeedka soo socda 2024/2025**

Codsiga waa in la sameeyaa inta lagu gudo jiro xilliga **4- 24 March 2024**, tani waa in la hubiyo in go'aanka gaadiidka dugsigu diyaar yahay billawga sannad dugsiyeedka gudaha bisha agoosto. Waa suurtogal in la codsado baska dugsiga sannadka oo dhan, laakiin wakhtiga habayntu waxa laga yaabaa in uu ka dheereeyo waqtigiisa, codsiga aan ku imaan inta lagu guda jiray muddada codsiga.

Si aad uga codsato adeegga elektarooningga ah, adiga codsadaha ah waxa aad u baahan tahay inaad haysato aqoonsi elektaroonig ah oo sax ah, haddii aanad haysan aqoonsi elektaroonig ah, waxaad ka helaysaa bangigaaga. Haddii aad codsiga ka samayso taleefanka gacanta oo aad dhib kala kulanto saxeexa, waxaad beddeshaa adiga shabakad akhriyahaaga taleefanka ama ka samee codsiga xagga kumbuyutarka. Fadlan ogow in labada waalidba loo baahanyaay in ay saxixaan haddii aysan ahayn mas'uuliyadda mid qof u kali ah.

Haddii xaaladuhu is beddelaan inta lagu jiro sannad dugsiyeedka, tusaale ahaan guuritaanka iyo ama beddelka dugsiyada awgeed, waa in codsi cusub la sameeyaa.

Codsiga waxaa lagu sameeyaa adeegga adeegga elektarooningga ah laga bilaabo 4-da maarso oo laga heli karo bogga degmada: [Skolskjuts - Borlänge \(borlange.se\)](http://Skolskjuts - Borlänge (borlange.se))

## **Go'aamo toos ah**

Go'aanka waxa loo sameeyaa hab farsamo iyada oo lagu salaynayo sharciga dugsiga ee hadda jira iyo xeerarka baska dugsiga ee leh lifaaqa la xidhiidha. Codsiyada qaarkood waxaa gacanta ku haya maamulayaasha baska dugsiga.

## **Ku saabsan xogtaada khaaska ah - Habaynta xogta shakhsiga ahaaneed**

Macluumaadka aad siiso degmada Borlänge anaga ayaa ka baaraandegi doona maaraynta, maamulka iyo dabagalka arrimahaaga. Habaynta waxa lagu fuliyaa nidaamkayaga hawlgalka. Xogta shakhsiga ah waxaa loo maamulaa si waafaqsan xeerarka ku jira xeerka ilaalinta xogta. Ka akhriso wax badan oo ku saabsan xuquuqdaada sida uu dhigayo sharciga ilaalinta xogta ee shabakadayada, [www.borlange.se/gdpr](http://www.borlange.se/gdpr).

## **Adeegga gaadiidka dugsiga - Bogga shabkadda**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka dugsiga waxaad ka heleysaa bogga degmada Borlänge: [Skolskjuts - Borlänge \(borlange.se\)](http://Skolskjuts - Borlänge (borlange.se))

